

Codsiga Thrive Maine waxa uu diyaar noqon doonaa bisha Sibteembar 2022. Kaliya hal qeyb oo saameynta dhaqaale xumada la xiriiirta caabuqa COVID ayaa la codsan karaa. Soo ogow qeybta saameynta ugu weyn ku leh ganacsigaaga. Isu diyaari inaad codsato adigoo soo urursanaya macluumaadka lagama maarmaanka ah.

HADDABA SAMEYSO LAMBARKA AQOONSIGA GAARKA AH (UEI)!

- Lambarka UEI ayaa loo baahan yahay si loo codsado. Tilmaamaha kusaabsan sida loo codsado lambarka UEI ama loo gudbiyo tikidhka macmiilka waxaa laga heli karaa [SAM.gov](https://www.sam.gov).
- Fadlan la soco, waxa ay qaadan kartaa ilaa 3 ilaa 6 toddobaad in hagaajinta lambarka UEI lagu dhammeystiro.

Waxa aad ubaahan tahay si aad u gudbiso codsigaaga:

- Lambarka UEI
- Ganacsigu waa inuusan wax dhib ah kala dhexeyn Gobolka Maine
- Mushaar bixinta, canshuuraha gobolka, iyo federaalka oo dhammaantood ah kuwi ugu dambeeyey
- Ganacsigu waa inuu hawlo muhiim ah kahayaa Maine (xarunta laga maamulo ay kutaalaa Maine ama ay ka joogaan ugu yaraan 50% oo shaqaalaha kamid ah oo shaqaalaha qandaraas lagula galaa gudaha Maine)
- Canshuur celinta dakhliga federaalka ama canshuur celinta dakhliga shakhsi ahaaneed ee 2019--2021
- Faa'iidada iyo khasaaraha sanadka 2021--2022-ilaa-hadda iyo xaashida dheelitirka
- Liiska iyo sharaxaada kusaabsan ujeedada dhammaan maalgelinta federaalka ee aafada caabuqa ee horay loo qaatay

Haddii aad u codsaneyso iyadoo lagu saleynayo khasaaraha EBITDA (Dakhliga Kahorreeya Dulsaarka, Canshuuraha, Qiima-dhaca, iyo Deyn Bixinta):

- Xisaabinta khasaaraha sanadka buuxa ee EBITDA (2020, 2021) loo barbardhigay musiibada caabuqa kahor (2019), laga jaray maalgelinta gargaarka musiibada kale ee federaalka ee horay loo qaatay
 - Caddeynta isbarbardhiga dhabta ah ee sanadba sanadka kadambeeya oo buuxa iyadoo loo marayo bayaanka dakhliga ama canshuuraha federaalka.
- FIIRO GAAR AH: majirto qiyaas ama mala'waal oo loo isticmaali karo bar isbarbardhig ahaan ah.

Haddii aad u codsaneyso iyadoo lagu saleynayo kharashaadki lagalay:

- Rasiidhada soo iibsashada iyo soodajinta agabyada, nidaamyada, adeegyada, ama softiweerka, sida kuwa loo soo dajiyey inay xaqiijiyaan badbaadada batrooniga iyo shaqaalaha.

Haddii aad u codsaneyso iyadoo lagu saleynayo qiimaha kharashka mashruuca raasumaalka ah oo kordhay:

- Caddeynta kharashaadka kordhay iyadoo ay ugu wacan tahay carqaladaha kuyimid silsilada ay marto sahayda.
- Tusaalooyinka waxaa kamid ah: adeegyada/badeecadaha iyo qiimayaashooda, isbarbardhiga sanadba sanadka kadambeeya, rasiidhada, iyo macluumaadka kale ee gaarka ah ee la diiwaan galiyay. FIIRO GAAR AH: Adeegyada/badeecadaha iyo qiimayaashooda ama rasiidhada waxa ay lagama maarmaan u yihiin labadaba qiimihii hore iyo qiimaha hadda si loo caddeeyo kororka ku yimid qiimaha.

TILMAAMAHA TIGNOOLAJIYADA AH

- "Farriimaha kasoo booda shaashada" waa in loo furaa baroosarkaaga intarneedka.
- Hayso dukumiintiyada loo baahan yahay oo seefgareysan oo u diyaari qaabka faylka PDF (.pdf) kahor inta aadan bilaabin codsiga onlaynka ah.

MA QABTAA SU'AALO KUSAABSAN THRIVE MAINE?

Caawin kahel FAME. Nagala soo xidhiidh Thrive@FAMEmaine.com